

WARGELINTA HESHIISKA DACWADA EE LAGU TELIYAY

**KU SOCOTA DHAMAAN CARUURTA WAKHTIGAN LA KORSADO EE WASHINGTON EE
KA YAR 18 JIR
EE LEH SHARAXA HOOSE:**

1. Waxa aad heshey **5 ama wax ka badan oo meeleynta daryeelka korsashada** (oo waxa aad badashay guriga cida ku korsanaysay ugu yaraan hal mar sanadkii lasoo dhaafay, hoos ka eeg faahfaahinta);
2. Waxaa lagu gudbiyay ama aad ku **jirtaa meeleynta daryeelka koox gobolka** ka baxsan;
3. Waxa aad la kulantay **joogitaan hudheel ama xafiis** lixdii bilood ee lasoo dhaafay; ama
4. Waxa aad sugaysaa sariir **Barnaamijka Bukaani Jifka Mudada Dheer ee Caruurta (Children’s Long-Term Inpatient Program, “CLIP”)**.

Hadii kor sifahaaga lagu sheegey, ama hadii aad daryeesho mid ama wax ka badan oo caruurta sifahooda lagu sheegey kor, fadlan u akhri wargelintan si taxadir leh.

Para acceder a una versión de este aviso traducida en *español*, visite <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>;

Để xem bản dịch thông báo này bằng *tiếng Việt*, vui lòng truy cập <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>;

សម្រាប់ការបកប្រែនូវសេចក្តីជូនដំណឹងនេះជា *ភាសាខ្មែរ*, សូមចូលមើល <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>; ສຳລັບການແປຈຳການນີ້ເປັນ *ພາສາລາວ*, ກະລຸນາເຂົ້າເບິ່ງ <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>;

如需本通知的 *中文版*, 请访问 <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>;

Перевод этого уведомления на *русский язык* опубликован по адресу <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>;

*한국어*로 번역된 공지문은 <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement> 를 방문하여 확인하실 수 있습니다;

Para sa pagsasalin ng notice na ito sa *Tagalog*, bumisita sa <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>;

በ *አማርኛ* ዘይቤ ማሳወቂያ ትርጉም ለማግኘት፣ እባክዎ <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>ን ይጎብኙ; Si aad ogeysiiskan ugu hesho *Af-Soomaali*, fadlan booqo <https://www.dcyf.wa.gov/ds-settlement-agreement>.

Waxaad tahay "xubin fasalka" dacwad loo yaqaan *D.S. et al., v. Washington State Department of Children, Youth, and Families, et al.*, Kiis lambar. 2:21-cv-00113. Dacwadan waxaa lagu sheegey: (1) The Department of Children, Youth, and Families inayna siinaynin caruurta la korsado adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin; (2) Caruur badan oo la korsadaa waxaa la raray dhawr jeer, oo waxa timid hataa inay degaan hudheel ama ka dejiyo meel ka baxsan gobolka ama xarumo CLIP.

Tani waxaa weeye heshiis lagu taliyay oo lagu doonayo in lagu soo afjaro dacwadan iyada oo aan maxkamad la gaynin. Maadaama oo aad tahay "xubin dacwada ah," xuquuqdaada ayay saamayn kartaa.

Sebteember 7, 2022, waxaa jiri doonta dhagaysi maxkamad oo Xaakin Barbara Rothstein ee Maxkamada Degmada Maraykanka ee Degmada Galmeed ee Washington. Xaakin Rothstein waxa uu go'aamin doonaa hadii uu ansixinayo heshiiska. Xaakin Rothstein waxa uu kaliya ansixin karaa heshiiska lagu heshiisyay hadii uu u arko inuu cadaalad yahay, macquul yahay oo uu ku filan yahay.

Waxa aad tegi kartaa dhagaysiga Maxkamada oo waxa aad u sheegi kartaa Xaakinka wixii fikir wanaagsan ama xun ah ee aad qabto.

Hadii aanad u arag in heshiiska lagu heshiinayaa in la ansixiyo, waad "diidi" kartaa oo waxaad u sheegeysaa Xaakinka sababta. Waxa aad u sheegi kartaa Xaakinka waxa aad u aragto adiga oo hadlaya ama u qoraya faaladaada oo u diraya. Hadii aad diido, laakiin, waxay u baahan tahay inaad u tagto ama inaad ka hadasho.

SAACADA DHAGAYSIGA: Sebteember 7, 2022, 1:00 duhurnimo

GOOBTA: Courtroom 16A, Seattle Courthouse for the Western District of Washington, 700 Stewart St., Seattle, WA 98101

****Waxa aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo aad su'aalo waydiin kartaa adiga oo raacaya tilmaamaha hoose. Fadlan ha ula hadlin ama xidhiidhin Xaakin Rothstein ama Karaaniga Maxkamada wixii ku saabsan Heshiiska Lagu Taliyay.****

Yaa Kamid ah Dacwadan?

Dacwad talaabada, hal ama wax ka badan oo dad ah ayaa dacweeyay iyada oo matalaya koox (loo yaqaan "Fasalka") oo leh dalab isku mid ah.

Kiiskan waxaa loosoo oogay iyada oo lagu matalayo heerka dhamaan caruurta ka yar 18 jir ee, ama mustaqbalka geli doona, meeleyn Washington State Department of Children, Youth, and Families nidaamka ku tiirsanaanta darteed (hoos yimaada Xeerka Dib u Eegida Lagu Sameeyay ee Washington § 13.34) oo buuxiya sifooyinka soo socda:

1. la kulmay 5 ama wax ka badan oo meeleyn (iyo (a) badalay guriga cida korsanaysa ugu yaraan hal mar sanadkii hore, ama (b) lagu wareejiyay Barnaamijka Daawaynta La Degayo ee U Qalma (Qualified Residential Treatment Program, QRTP) sanadkii lasoo dhaafay ama wax ka badan);
2. waxaa lagu gudbiyay ama aad ku jirtaa meeleyn daryeelka koox gobolka ka baxsan;
3. waxa aad la kulantay joogitaan hudheel ama xafiis lixdii bilood ee lasoo dhaafay; ama

4. waxa aad sugaysaa sariir Barnaamijka Bukaani Jifka Mudada Dheer ee Caruurta (Children's Long-Term Inpatient Program, "CLIP").

Hay'ada Xuquuqda Laxaad La'aanta Washington (Disability Rights Washington, DRW) ayaa sidoo kale dacwaynaysa hay'ada ahaan. Waxaa weheliya, Fasalka iyo Xuquuqda Laxaad La'aanta Washington oo loo yaqaan "Dacwoodayaasha" Dacwada waxaa laga soo gudbiyay Washington State Department of Children, Youth, and Families iyo Xoghayahooda. Si wada jir ah, waxaa loogu yaqaanaa "Eedeysanayaasha" ama "DCYF."

Maxay Ku Saabsan Tahay Dacwadu?

Dacwadani waxay ku saabsan tahay hadii DCYF ay siinayso Fasalka adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin.

Dacwoodayaashu waxay sheegeen hadii ayna jirin adeegyada iyo taageerada daryeelka korsashada ee munaasabka ah, caruur badan oo la korsadaa in laga kaxaynayo qoyskooda iyo qarabaadooda mudo ka dheer intii ay ahayd inay ka maqnaadaan. Intay ka maqan yihiin qoysaskooda, caruurta la korsadaa waxay ku noolaan karaan:

- xarumo ka baxsan gobolka,
- sii joogi karaan daryeelka korsashada ee halka habeen, iyo/ama
- joogitaanka hudheelka/xafiisyada dawlada.

Dacwoodayaashu waxay sheegeen in nidaamkan uu ku xad gudbayo xuquuqda caruurta ku jirta Fasalka. Eedeysanuhu waxa uu diiday inuu ku xad gudbay xuquuqda caruurta ku jirta Fasalka. Dacwada waxaa lagaga dalbaday in Maxkamadu ay ka dalbato DCYF inay samayso hormar. Cid kamid ah xubnaha fasalka lama siin doonto wax lacag ah "waxyeelada" ah.

Maxaa Lagu Samaynaa Heshiiska?

Halkii ay ka tegi lahayd dacwad dhagaysi, Dacwoodayaasha iyo Eedeysanayaashu waxay ku heshiiyeen "Heshiis Lagu Heshiiyay." Dhinacyadu waxay ka dalbadeen Xaakin Rothstein inuu u ansixiyo Heshiiska Lagu Heshiiyay ee Fasalka.

Wargelintan waxay soo koobaysaa Heshiiska Lagu Heshiiyay:

Heshiiska Lagu Heshiiyay waxaa weeye qorshe DCYF ay ku hormarinayso adeegyadeeda. Hormaradan

waxaa kamid ah jahwareerada soo soda ee laga warqabo, dhaqanka qadarinaysa, iyo LGBTIQA+ oo xoojinaysa ikhtiyaarada kale ee aan ahayn meeleynta daryeelka korsashada ee ka baxsan gobolka, hudheelka/xafiiska, iyo xarumaha halka habeen la joogo:

Samaynta Barnaamijka Guryaynta Caruur Nimada: DCYF waxay samayn doontaa oo ay dhaqan gelin doontaa barnaamijyo guryayn taageero oo gobolka oo dhan ah oo loogu talo geley dadka dhalinyarta ah ee lix iyo toban jir ilaa labaatan jirada ah ee ku jira daryeelka korsashada ama daryeelka korsashada mudada dheer ah ee u qalma barnaamijka oo waxaa loo gudbin doonaa inay u noolaadaan si madax banaan halkii habdhismeed qoys kaga noolaan lahaayeen.

Waalidnimada Korsashada Daawaynta Xirfadeed: DCYF waxay samayn doontaa oo ay dhaqan gelin doontaa heshiiska iyo qaybta liiskan ee xirfadlayaasha waalidka korsashada dabiibka ee daryeelka caruurta qaba laxaad la'aan korniin ama baahiyo caafimaadka habdhaqanka ah.

Barnaamijka Qaabaynta Guriga Xarunta Gobolka oo Dhan: DCYF waxay samayn doontaa oo ay dhaqan gelin doonaan barnaamijka Qaabaynta Guriga Xarunta (Hub Home Model, HHM) oo gobolka oo dhan ah oo loogu talo geley korsashada, qaraabada, iyo qoysaska loo doortay inay taageeraan caruurta la korinayo.

Sidoo kale, DCYF waxay hormar la taaban karo ku samaynaysaa ka caawinta meeleynta in inta ka badan intii hore lagu guulaysto hawlaha soo socda iyada oo loo marayo:

Dib u Eegida Heerarka Liisan Siinta: DCYF waxay wax ka badali doontaa shuruudaha liiska ee meeleynta daryeelka koriyaha si uu si dhaanta ugu munaasab noqdo oo uu u dabacsanaado oo uu u buuxiyo baahiyaha dhalinyarta shakhsiga ah.

Wada Shaqaynta Cida Danta Ka Leh: DCYF waxay shaqaalaysiin doontaa Fududeeyayaal Dan Ka Leh oo u qalma oo ah looyar, uruuriye, iyo wargelinta macluumaadka cida danta kaga jirto wixii ku saabsan dadaaladan hormarinta:

Qaybta Wada Shaqaynta Qaraabada: DCYF waxay samaysay Qaybta Wada Shaqaynta Qaraabada (Kinship Engagement Unit, KEU) gobolka oo dhan oo ay ku jiraan ka helida ku dayashada qoyska iyo la shaqaynta qaraabada Xubinta Fasalka iyo asxaabta si looga taageero qoysaska inay si amaan ah dib ula midoobaan ama ay wada joogaan.

Gudbinta iyo Kala Guurka: DCFY waxay samayn doontaa gudbin iyo nidaamka kala guurta oo si dhaanta u taageeraya caruurta iyo dhalinyarta marka isbadal uu ku yimaado noloshooda.

Qorshaynta Kooxda Qoyska: DCYF waxa ay wax ka badal ku samayn doontaa Kulankooda Qorshaynta La Wadaagay (Shared Planning Meeting, SPM) iyo siyaasada Kulanka Go'aanka Kooxda Qoyska (Family Team Decision Meeting, FTDM) iyo nidaamyada si qaab dhaama loogu taageero rabitaanka iyo go'aamada ilmaha iyo qoyska.

Meelaynta Daryeelka Kooxda: DCYF waxay samayn doontaa nidaam qiimayn oo dhamaystiran oo lagu ogaanayo hadii ay ku munaasab tahay oo ay daruuri tahay in ilmaha la dejiyo xarun daryeel kooxeed.

Qorshaha Dhaqangelinta: DCYF waxay samayn doontaa Qorshaha Dhaqangelinta ee sharaxa sida ay u buuxin doonta dadaalkeeda, iyo goorta adeegyada cusub la heli karo. Qorshaha qaybo qoraalka ah waxaa loo diyaar doonaa dadka oo dhan si ay uga dhiibtaan fikirkooda kahor inta aan lasoo saaran ka ugu danbeeya.

La Socodka: Kathleen Noonan waxa loo dooran doonaa Kormeeraha u hogaansanka DCYF ee Heshiiska Lagu Heshiiyay. Kormeeruhu waxa uu eegi doonaa Qorshaha Dhaqan Gelinta DCYF, waxa uu u eegi doonaa macluumaadka si joogto ah ku saabsan waxqabadka DCYF, oo waxa uu gudbin doonaa warbixinta shacabka sanadkii ee hormarka DCYF ee dhaqan gelinta shuruudaha Heshiiska Lagu Heshiiyay.

Dhamaadka Heshiiska: DCYF waa inay sii wado hirgelinta Heshiiska Lagu Heshiiyay ilaa inta Xaakin uu go'aaminayo in DCYF ay samaysay dhamaan isbadaladii lagu heshiiyay. Marka ay go'aankooda gaadhayaan, Xaakinku sidoo kale waxa uu eegi doonaa hadii:

- 90 % dhalinyarta iyo caruurta u qalanta loo gudbiyay ama dalbanaya adeegyada cusub looga jawaabay 60 maalmood gudahood dalabkooda ama gudbintooda;
- Waxaa meesha laga saaray meeleyn hudheelka/xafiiska iyo daryeelka korsiiimaha habeen-habeenka ah;
- Tirada meeleynta xarumaha ka baxsan gobolka waxaa laga dhigay 10 ama wax ka yar, iyada oo laga soo reebo moojee; iyo
- Tirada caruurta wax ka badan shan leemeyn loo sameeyay aad ayaa loo yareeyay.

Dacwada laguma dalban lacag waxyeelada ah, markaa **Heshiiska Lagu Heshiiyay kuma jiro lacag waxyeelo waxay doonto ha noqotee oo xubnaha wax fasal ah.** Kaliya waxaa lagu dalbaday isbadalada kor lagu soo koobay.

Heshiiska Lagu Heshiiyay sidoo kale waxa uu siiyaa Dacwoodayaasha looyar uu bixinayo kharashkiisa Eedeysanuhu. Dacwoodayaashu uma dalban doonaan wax lacag ah caruurta Dacwoonaysa oo xubnaha

fasalka laguma yeelanayo wax lacag ah, kharash, ama khidmad waxay doonto ha noqotee la xidhiidha dacwadan. Dhinacyadu waxay wakhtigan ka wada hadlayaan bixinta kharashka iyo khidmada looyarka. Waxaad ka heli kartaa xaraynta Dacwoodahayaasha macluumaadka looyarta kharashkiisa iyo khidmadiisa marka la gaadho Agoosto 5, 2022 ama wixii ka horeeya websaytka DRW ee <https://www.disabilityrightswa.org/cases/d-s-v-washington-state-department-of-children-youth-and-families> iyo/ama websaytka Sharciga Xarunta Qaran ee Dhalinyarta <https://youthlaw.org/settlement-ds-v-washington-state-dcyf>.

Halkii maxkamada la isla geli lahaa oo laga dalban lahaa Xaakin inuu u xukumo Dacwoodayaasha ama Eedeysanaha, DCYF iyo Dacwoodayaashu waxay ka dalbadeen Xaakinka inuu u ansixiyo Heshiiska Lagu Heshiiyay.

Waxa aad xaq u leedahay inaad akhrido Heshiiska Lagu Heshiiyay oo dhan. Si aad u hesho nuqul Heshiiska Lagu Heshiiyay ah, fadlan waxa aad raacdaa tilmaamaha hoose ama booqo websaytka DRW ee <https://www.disabilityrightswa.org/cases/d-s-v-washington-state-department-of-children-youth-and-families> iyo/ama websaytka Sharciga Xarunta Qaran ee Dhalinyarta <https://youthlaw.org/settlement-ds-v-washington-state-dcyf>.

Waxa aad sidoo kale xaq u leedahay inaad u sheegto Xaakinka waxa aad u aragto Heshiiska Lagu Heshiiyay si aad uga caawiso Xaakinka go'aanka hadii uu ansixinayo iyo hadii kaleba. Waxa aad taas samayn kartaa adiga oo u diraya fikirkaaga oo qoraal ah, ka qayb galaya iyo/ama macluumaad ka jeedinaya Dhagaysiga Ansixinta ee Ugu Danbeeya, ama labadaba. Tilmaamaha sida aad tan u samaysan kartaa waxay ku yalaan hoos.

Waa maxay Ikhtiyaaradaydu?

Sii Fikirkaaga Xuquuqda Laxaad La'aanta Washington si Ay Ula Wadaagto Maxkamada:

Waxaa fikirkaaga kula wadaagi kartaa Xuquuqda Laxaad La'aanta Washington (Disability Rights Washington, DRW) adiga ii iimeel, warqad ama taleefan u diraya. Fikirkaagu waa inuu soo **gaadhaa ugu danbaysn** Agoosto 12, 2022, si Maxkamadu u eegto. Fikirada DRW waxaa lagu soo diri karaa wax kamid ah kuwa soo socda:

Boosta: Disability Rights Washington, 315 5th Ave. S., Suite 850, Seattle, WA 98104

Iimeel ahaan: DSSettlement@dr-wa.org

Taleefan ahaan: 206-324-1521 ama 1-800-562-2702

Waa inaad saxeexdaa warqadaada oo aad ku dartaa magacaaga iyo macluumaadka ku saabsan sida laguula soo xidhiidhayo (cinwaanka, iimeelka, taleefan lambarka, iwm.). DRW waxay la wadaagi doontaa fikirkaaga Xaakinka iyo looyarka DCYF 7 maalmood gudahood marka aad hesho, iyo Xaakinka Agoosto 22, 2022 ama wixii ka horeeya.

Ka Qayb Galka Dhagaysiga Cadaalada ah: Waxaa jiri doona dhagaysi furan oo shacabku ay ku go'aamin doonaan hadii Heshiiska Lagu Heshiyyay uu yahay cadaalad, macquul iyo wax ku ool. Dhagaysigu waxa uu ka dhacayaa 1:00 duhunmm Sebteember 7 2022, Courtroom 16A ee Federal Courthouse oo ku taal 700 Stewart Street, Seattle, WA 98101.

Waad ka qayb geli kartaa oo waxa aad ka hadli kartaa dhagaysiga si aad ula wadaagto fikirkaaga Xaakinka. Dhagaysiga kadib, Maxkamadu waxay gaadhi doontaa go'aanka ugu danbeeya ee hadii heshiisku la ansixinayo ah.

Hadii taariikhda, saacada, ama goobta dhagaysiga la badalo, ama wax kale oo macluumaadka ku saabsan dhagaysigu uu isbadalo, macluumaadka cusub waxaa lasoo gelin doonaa websaytka DRW ee <https://www.disabilityrightswa.org/cases/d-s-v-washington-state-department-of-children-youth-and-families> iyo/ama websaytka Sharciga Xarunta Qaran ee Dhalinyarta <https://youthlaw.org/settlement-ds-v-washington-state-dcyf>. Laguuma soo diri doona wargelin kale oo isbadalka ah.

Iyada oo Xaakinku go'aamiyo moojee inuu sameeyo wax laga soo reebey, Xaakinku ma eegi doono wax diidmo ah oo aan la horkeenin wakhtiga dhagaysiga ama kahor sida kor lagu sheegey.

Sidee Ayaan U Heli Karaa Macluumaad Dheeraad ah Ama U Waydiin Karaa Su'aalo?

Nuqulka Heshiiska Lagu Heshiyyay iyo macluumaadka kale ee waxtarka leh, oo ay ku jiraan sida looga qayb gali karo dhagaysiga, waxaa laga heleyaa websaytka DRW ee <https://www.disabilityrightswa.org/cases/d-s-v-washington-state-department-of-children-youth-and-families> iyo/ama websaytka Sharciga Xarunta Qaran ee Dhalinyarta <https://youthlaw.org/settlement-ds-v-washington-state-dcyf>. Waxaa sidoo kale kala xidhiidhi kartaa Xuquuqda Laxaad La'aanta Washington si toos ah wixii su'aalo ah ama si aad u dalbato nuqul Heshiiska Lagu Heshiyyay ah boosta: Disability Rights Washington, 315 5th Ave. S., Seattle, WA 98104, ama iimeel ama taleefanka: 1-800-562-2702 iyo DSSettlement@dr-wa.org.

****Fadlan taleefanka haka garaacin Xaakin Barbara Rothstein ama Karaaniga Maxkamada****

Kaagama jawaabi karaan su'aalaha gaarka ah ee aad ka qabto dacwada ama Heshiiska Lagu Heshiyyay. Laakiin, waxa aad akhrin kartaa macluumaad furan ee lagu xareeyay Maxkamada adiga oo qabanaya Xafiiska Karaaniga Maraykanka District Court ee Western District ee Washington oo ku taal 700 Stewart Street, Seattle, WA 98101. Miiska Xafiiska Karaanigu waxa uu furan yahay maalmaha shaqo ee 9:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo, marka laga tago maalmaha ciidaha ah. Waxa aad sidoo kale ka heli kartaa waraaqaha maxkamada ee kiiskan, oo bilaash ah, nidaamka Duwaanada Elektoroniga ah ee Maxkamada ee Shacabka Ay Maxkamadu Ugu Talo Gashay (Court's Public Access to Court Electronic Records, PACER) <https://pacer.uscourts.gov/>. Si aad u akhrido macluumaadka duwaanada shacabka ee kiiskan, ka eeg Kiis Lambar 2:21-cv-00113.